



CABSIDA KU YAREE XAQIIQOYINKA!



Macluumaadka Mas'uuliyadda Dowladda La Cusboonaysiiyay Febraayo 2020

Ogow xaqiiqooyinka. Waxaad leedahay xuquuqo: Jaangooyooyinka federaalka cusub ee adag ee loogu talagalay go'aaminta marka muhaajirku ay u badan tahay in uu noqdo qof ay mas'uul ka tahay dowladda waxaa ay keeni kartaa in shakhsiyad fara badan oo **uusan** saameyn doonin xeerka in ay ka baxaan diiwaanka dheefaha. **Nuxurka ama waxyaabaha ku qoran dokumentigan ma ahan talo sharci.** Xaalad socdaal kasta waa mid gaar ah. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan adiga ama xaaladda xubin ka tirsan qoyka iyo/ama isticmaasho dheefo, waxaa la heli karaa kheyraad bixinaya caawimaad bilaash ah oo qarsoodina ah.



Xeerarka cusub ee mas'uuliyadda dowladda ma saameeyaan muhaajiriinta intooda badan.

Qaxootiga, magangalyo doonada, kuwa ka badbaaday ka ganacsiga dadka, rabshadaha guriga, iyo dembiyada kale ee halista ah, iyo muhaajiriinta kale ee "bani'aadamnimo" ma saameeyaan. Dadka sida sharciga ah ku deggan (ama haysta "kaararka cagaaran") ma sameeyaan haddii ay Mareykanka ka tagaan 180 maalmood oo ayna raadiyaan in ay mar kale soo galaan mooyee. Dheefaha la helay marka ay dadku ku sugan yihiin xaaladdahaasi looma tixgelin doona si iyagga ka dhan ah.



Barnaamijyada dadweynaha badankooda laguma tixgeliyo tijaabada mas'uuliyadda dowladda federaalka.

Barnaamijyada nafaqada iyo cuntada nolosha badbaadisa sida WIC, CHIP, qadooyinka iskuulka, bankiyada cuntada, hoyga, gargaarka daryeelka carruurta, daryeelka caafimaadka ee laga maalgeliyo dowladda hoose iyo gobolka, iyo barnaamiyo kaloo badan laguma daro tijaabada mas'uuliyadda dowladda federaalka.



Isticmaalka barnaamijyada dowladda si otomaatik ah qofku ugama dhigaan qof ay mas'uul ka tahay dowladda.

Saraakiisha socdaalka waa in ay eegaan **dhammaan duruufaha jira** marka ay go'aaminayaan haddii shakhsiyadka ay u badan tahay in ay mustaqbalka mas'uul ka noqoto dowladda. Tani waxaa ka mid ah da'daada, caafimaadkaaga, dakhligaaga, hantidaada, kheyraadkaaga, waxbarashadaada/xirfadahaaga, qoyska shakhsigu ay tahay in uu taageero, iyo qoyska taageeraya shakhsiga. Cunsurrada wanaagsan, sida haysashada shaqo ama caymis caafimaad, waxaa lagu miisaami karaa cunsurrada xun, sida isticmaalidda dheefaha qaar ama lahaanshaha xaalad caafimaad. Shakhsiyadka waxaa ay heli doonaan fursad ay ku muujinayaan sababta aysan u badnayn in ay ku tiirsadaan dheefaha qaar mustaqbalka.



Dheefaha ay adeegsadeen xubnaha qoyska laguma xisaabay go'aamada mas'uuliyadda dowladda ee uu qaatay Mareykanka.

Xubnaha qoyska Muwaadinka Mareykanka ah waxaa ay cabsi la'aan adeegsan karaan barnaamijyada nafaqada, cuntada, ama guryeynta. Ku daridda magaca waalidka ee arjiga cunugooda macanadeedu MA AHAN in ay dheefo laf ahaantooda codsadeen.



Waxaa jira sharciyo ilaalinaya macluumaadka ku qoran arjiyada dheefaha dowladda iyo qaatayaasha.

Sharciyada gobolka iyo kuwa federaalka guud ahaan waxaa ay ilaaliyaan asturnaanta macluumaadkaaga marka aad codsanayso ama aad helayso caynsanaanta daryeel caafimaad, nafaqo, taageero dhaqaale, ama dheefaha kale ee dowladda.

CAAWIMAAD BILAASH AH OO QARSOODINA AH

Caawimaad ayaad heli kartaa! Haddii aad qabto su'aalooyin ama walaac gaar ah oo khuseeya saamaynta isticmaalida dheefaha dadweynaha ee ku saabsan xaaladdaada socdaalka, la xiriir qareen socdaal.

La xiriiri mid ka mid ah ururradan soo socda si aad u hesho caawimaad:

- Khatka Tooska ah ee CLEAR: 1-888-201-1014
- Mashruuca Xuquuqaha Muhaajirka ee Waqooyi-galbeed (NWIRP):
 - Xafiiska Magaalada Seattle ee NWIRP: 206-587-4009
 - Xafiiska NWIRP Yakima Valley (Granger): 509-854-2100
 - Xafiiska NWIRP Wenatchee: 509-570-0054

Kheyraadka ayaa sidoo kale la heli karaa iyada oo loo marayo mid ka mid ah ururrada ku qoran mareegtada Guddoomiyaha Gobolka: <https://www.governor.wa.gov/issues/issues/safe-communities/immigration-and-refugee-resources>